

treenkasaliidaqaada

Xaqiiqada: Tareenka saliida qaada waa nooc ka mid khataraha sida degdega ah u dhaca iyadoo ay sababi karta in ay soo kordhiso khatar qarax, iyo sallida shidaalka oo oo hoos ka soo dusta ama sii deysa kiimiko iyo waxyaaba kale ee khatar ku ah deegaanka. Waxaa la bixinayaa amar ah in la qaxo ama la tago hooy aamin ah wakhtigaas qaybo ka mid ah Seattle si loo xaqiijiyo amniga guud.

Maxaa la sameeyaa:

- Raac dhammaan tilmaamaha iyo jawaabta ay bixiyayaan howlwadeenada gurmada degdega ah. Waxaa laga yaabaa in lagu warsado in aad ka tagtid aagga ama joogto meesha aad joogto, waxeyna ku xiran tahay hadba meesha aad joogto. Si deg deg ah uga bax maka lagu amro.
- Ha daakhilin hawladeena gurmada degdega ah.
- Haddii lagu warsado in aad hoyga ama guriga gabaad ka dhigato, gudaha soo geli ehelkaaga iyo xayawaanka sida eyga ama bisada. Xir albaabada, daaqadaha iyo meelaha marwaxadaha dabka laga shido. Dhig tuwaal qoyan iridda albaabka iyo meelaha furan oo kale oo ay dabeyshu ka soo geli karto. Dami marawaxadaha, qaboojiyaha iyo nidaamka diirinta hawada qasabka ah keena. U diyaar garowi in aad farsameeyso oo aad isticmaasho waxaad gacanta ku heyso si aad u daboosho meelaha banana si aad u abuurtid wax idiin dhaxeeya adiga iyo hawada dibada ka imaaneysa.
- Haddii lagu warsado in aad ka qaxdo, sidaas yeel isla markiiba. Raac jidadkasto geeddiga ogeysiisku bixinayo. Qaar ka mid ah jidadka waxay yeelan karaan calaamado ku yaala dhinacyada waddooyinka iyo jidadka waaweyn.
- La soco raadiyaha si aad ula socoto akhbaraadka degdeg ah.
- ***Haddii aad garaneyso qof aan awoodin in uu fahmo, arko, ama aan maqlin farriintan, fadlan u sheeg waxa ay ku saabsantahay.***

Xiriir kale ee ku caawinaya:

<http://dot111.info/>